

10 XAQIIQADOOD OO LA XIDHIIDHA BARNAAMIJKA LACAGTA DANYARTA OO LOO BAAHAN YAHAY INAAD OGAATID

XAQIIQ: Barnaamijka Lacagta Danyarta ma ah barnaamijka Daryeelka Dadwaynaha (Welfare program). Waa mid la xidhiidha barnaamijka daryeelka xanaanada ee loogu talo galay inuu caawiyoo dadka dakhligoodu hooseeyo iyo qoysasku inay ku iibsadaan raashinka xanaanada leh.

XAQIIQ: Barnaamijka Lacagta Danyarta waa barnaamij aan xaq-uleedahay. Taasi waxay micnaheedu tahay, cid kasta oo dalbataa buuxiyana shuruudaha waxay xaq uleeyihiin inay helaan faa'idooyinka lacagta danyarta.

XAQIIQ: Lacagta danyarta waxa loogu talo galay shakhsiyaadka xaq uleh iyo qoysaska marka lagu daro waayeelka, dadka la'xaadka la' qoyska inta ka shaqaysa, dadka qaar kuwa buuxiya sharciga haajiraada iyo caruurta ku dhalatay Maraykanka.

XAQIIQ: Shakhsiyaadku way la'haan karaan guri wayna iibsan karaan, walibana way heli karaan lacagta danyarta. Guriga iyo jagada looma xisaabiyoo wax yaabaha daruuriga ah marka loo eego Barnaamijka lacagta Danyarta. Barnaamijka Lacagta Danyarta kama rabo inuu qofku usaxeexo gurigiisa.

XAQIIQ: Sanadkii 2000 Dadka waayeelka ah ee kalidood nooli waxay helaan inta badan \$43 bishii; dadka waayeelka ah ee aan kalidood noolayni waxay helaan inta badan \$118 bishii.

XAQIIQ: Hadii aanu qof waayeel ahi ama qof la'xaad la'i tagi karin xafiiska lacagta danyarta, isagu ama iyadu waxay codsan karaan waraysi xagga telefanka ah. Waxa kale oo uu qofku waydiisan karaa qof ay qaraabo yihiin, sheekh, ama qof ay jaar yihiin iyo wixii la mid ahi inay uga soo

qayb gali karaan waraysiga iyaga oo ah wakiilka la ogolaaday. Qofka dalbaday helayana lacagta waayeelka ka soo gasha Dammaanada Bulshada (Supplemental Security Income - SSI) waxa kale oo qofkaasi ka dalban karaa xafiiska Dammaanada Bulshada (Social Security Office) faa'idooyinka lacagta danyarta.

XAQIIQ: Kharashka kaaga baxa caafimaadku hadii uu dhaafo \$35 bishii waxa laga dhimi karaa lacagta dhan ee soo gasha qoyska waa hadii shirkad caymis ahi ama qof aan qoyska ka tirsanaynin bixiyo. Waxa lagaa dhimi wixii dhaafsiisan \$35.

XAQIIQ: Wax yaabaha daryeelka waayeelka ama iyaga ha loogu talo galo ama qoys ha ku tiirsanaadeene qofkii waayeel ahiba wuxuu ku kooban yahay \$3,000. Wax yaabaha kale ee daruuriga ahi waxay ku kooban yihiin ilaa \$2,000.

XAQIIQ: Inta Qoysku ka kooban yahayba way heli karaan lacagta danyarta walibana waxay heli karaan Raashinka Baabuurta lagu qaado ee aan dadka aan awoodi Karin guryahooda loogu geeyo (Meals-on Wheels), waxyaabaha gaarka ah sida faa'idooyinka Barnaamijka Xanaanada haweenka sabiga iyo caruurta la siiyo (Special Supplemental Nutrition Program for Women, Infants and Children - WIC) iyo faa'idooyinka xanaanada ilamha sida Kharashka Qadada Ardayda Iskuulka laga dhimo (School Lunch Program).

XAQIIQ: Helintaanka aad heshay Barnaamijka Lacagta Danyartu qofka qoyska ka tirsan ee haysta Sharciga haajiraada ma noqdo xil dawlada saaran.

Xaashida Udbiganta Lacagta ee Danyartu waxay xoojisa Maraykanka.